

Burn Care

Know how to care for your burn to prevent infection. Make sure you:

- Keep the burned area raised above the level of your heart.
- Keep the bandages clean and dry.
- Change the bandages each day. Follow these steps:
 1. Wash your hands well with soap and water before touching your burn or bandages.
 2. Remove the old bandages and throw them away. If the old bandages stick to the burn, soak them off with warm water. **If you have a long term dressing such as Mepilex Ag**, remove the outer bandage only. The Mepilex Ag dressing should remain in place for one week. **Do not get this dressing wet.**
 3. Clean off the old cream or ointment with a clean washcloth wet with warm water and a gentle soap or baby shampoo. Try not to break blisters. **If you have a Mepilex Ag dressing, skip this step.**
 4. Wash your hands again.
 5. Apply cream or ointment if checked (✓):
 - Apply silver sulfadiazine (Silvadene Cream) in a thin layer about the thickness of a nickel.
 - Apply _____ antibiotic ointment. Use just enough ointment to make the burn look shiny.
 6. Follow the direction below if checked (✓):
 - Do not cover your burn with a bandage.
 - Use non-stick gauze covered with several layers of dry gauze.

Daryeelka Gubashada

Ogow sida loo daryeelo gubashadaada si aad uga hortagtid jeermis/ caabuqa. Xaqiiji in aad:

- Meesha gubatay kor uga qaaddid heerka wadnahaaga.
- Faashadaha nadiifi oo ha engegnaadaan.
- Faashadaha beddel maalin kasta. Tallaabooyinkaan raac:
 1. Si fiican gacmaha isaga dhaq saabbuun iyo biyo ka hor inta aadan taabannin meesha gubatay ama faashadaha.
 2. Faashadihii hore ka saar meesha oo tuur. Haddii faashadihii hore ay ku dhegeen meesha gubatay, biyo diirran ku qoy. **Haddii uu kuu saaran yahay faashad mudo dheer loogu talagalay sida Mepilex Ag**, ka qaad kaliya faashadda sare. Waa in faashadda Mepilex Ag ay meesha saarnaato hal todobaad. **Ha qoynin faashadaas.**
 3. Dheehii ama boommatadii hore isaga nadiifi maro dhiqis oo nadiif ah oo biyo diirran lagu qooyey iyo saabbuun fudud ama shaambada carruurta. Isku day in aadan jebin qolofa. **Haddii ay kuu saaran tahay faashadda Mepilex Ag, ka bood talaabadan.**
 4. Gacmaha mar kale iska dhaq.
 5. Dheeh ama boommaato mari haddii la calaamadeeyay (✓):
 - Iska mari silver sulfadiazine (Dheeha Silvadene) oo la saaray lakab khafiif ah oo dhumucdiisu la mid tahay sida nickel.
 - Mari _____ boommaato antibiyootiko ah. Isticmaal boommaato kugu filan si aad meesha gubatay uga dhigtid mid u eg sidii wax dhalaalaya.
 6. Raac jitheynta hoose haddii la calaamadeeyay (✓):
 - Meesha gubatay ha ku daboolin faashad.
 - Isticmaal sharooto aan meesha ku dhegeynin oo lagu daboolay dhowr lakab oo shorooto engegan ah.

Use non-stick gauze over antibiotic cream or ointment then several layers of dry gauze.

Other _____

For burns on hands or feet, always place a layer of gauze between fingers or toes.

- Gently exercise the area four times a day by bending the joints 10 to 20 times. Gentle exercise helps prevent stiffness.
- Drink plenty of liquids, at least 10 to 12 glasses a day.
- Eat extra protein found in meat, eggs, fish, chicken and dairy products. Eat foods high in Vitamin C such as fruits, especially citrus fruits, and vegetables. Good nutrition will help your burn heal.

Call your doctor right away if you have:

- Redness or swelling around the wound
- Red streaks going up your arm or leg
- Pus draining from the wound
- Fever greater than 100.5 degrees F or 38 degrees C
- Increasing pain or pain that is not relieved by medicine
- Foul odor noted **after** the wound has been cleaned and the old dressing has been thrown away

If you cannot reach your doctor, go to the Emergency Room.

Isticmaal sharooto aan meesha ku dhegeynin ama dheeh antibiyootiko ah ama boommaato ka dibna dhowr lakab oo sharooto engegan ah.

Wax kale _____

Gubashooyinka gacmaha ama cagaha, mar kasta saar sharooto inta u dhexeysa faraha ama suulasha.

- Si tartiib ah meesha ugu jimci afar mar maalintiiba adigoo soo laabaya kala goosyada 10 ilaa 20 goor. Jimcin tartiib ah waxay ka caawinaysaa ka hortagga in meesha taaganto.
- Cab cabitaanno fara badan, ugu yaraan 10 ilaa 12 koob maalintiiba.
- Cun borotiin dheeraad ah oo laga helo hilibka, ukunta, kalluunka, digaagga iyo waxyaabaha caanaha laga sameeyo. Cun cuntooyin ay ku badan yihiin Fitamiin C sida furutooyinka, gaar ahaan furutada liinta, iyo khudrad. Nafaqo wanaagsan waxay kaa caawin doontaa in gubashadu ay bogsato.

Isla markiiba wac dhakhtarkaaga haddii aad:

- Isku aragto guduudasho ama barar dhaawaca dhinacyadiisa ah
- Xarriiqyo guduudan oo gacantaada ama lugta kor ugu saaqaya
- Malax dhaawaca ka soo burqanaysa
- Qandho ka sarraysa 100.5° darajo F ama 38° darajo C
- Xanuun sii kordhaya ama xanuun aysan daawadu kaa baabi' in karin
- Ur xun oo aad ogaato marka dhaawaca la nadiifiyo ka **dib** oo dhayiddii horena laga tuuray

Haddii aadan dhakhtarkaaga gaari karaynin, aad Qolka Gargaarka Degdegga.

2005 – 9/2011 Health Information Translations

Unless otherwise stated, user may print or download information from www.healthinfotranslations.org for personal, non-commercial use only. The medical information found on this website should not be used in place of a consultation with your doctor or other health care provider. You should always seek the advice of your doctor or other qualified health care provider before you start or stop any treatment or with any questions you may have about a medical condition. The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System, OhioHealth and Nationwide Children's Hospital are not responsible for injuries or damages you may incur as a result of your stopping medical treatment or your failure to obtain medical treatment.

Burn Care. Somali.